

Dammaanadda Akhriska Fasalka Saddexaad: Macluumaadka ku saabsan Codsiga Ka- dhaafitaanka ee Waalidka

Waa maxay codsiga ka-dhaafitaanka ee waalidka?

Ohio gudaheeda, waalid/daryeele ahaan waxaad codsan kartaa in ilmahaaga loo dalacsiyo fasalka 4-aad iyadoon loo eegin in ilmahaaga gaaray buundada dallacsiinta ee imtixaanka gobolka Ohio ee fasalka 3-aad ee fahanka luuqada Ingiriisiga.

Inkasta oo adiga waalid ahaan aad bixinayso fasaxa kama dambaysta ah ee ku saabsan in ilmahaaga u gudbayo fasalka afraad iyo in kale, waxaad u baahan tahay inaad kala hadasho macalinka akhriska ee fasalka 3-aad iyo maamulaha dugsiga. Waa kuwan qaar ka mid ah su'aalaha tusaalaha ah ee aad weydiin karto dugsiga.

Su'aalaha Tusaalaha ah

- Marka laga soo tago imtixaanka gobolka Ohio ee fasalka 3-aad ee fahanka luqadda Ingiriisiga, waa maxay qiimaynta akhriska ee kale ee la bixiyay sanadkan oo sidee ayuuna ilmahayga buundooyinka u keenay?
- Waa maxay taageerada akhriska ee dugsiga siiyay ilmahayga sanadkan iyo horumarka uu sameeyay ilmahayga?
- Maxay yihiin xirfadaha asaasiga ah ee ubadkaygu u baahan yahay inuu ka shaqeeyo si uu dib ugu soo laabto wadadii saxda ahayd?
- Sidee bay xirfadaha wax-akhris ee ilmahayga u saameeyeen maadooyinka kale ee waxbarasho?
- Haddii aan doorto in ilmahayga u gudbo fasalka 4-aad, waa maxay taageerada akhriska ee ilmahayga ka heli doono fasalka 4-aad?
- Yaa noqon doona macalinka ilmahayga fasalka 4-aad 90+ daqiiqo ee loo baahan yahay ee wax akhrinta maalinlaha ah, oo ay ku jirto taageerada waxbarasho ee degdega ah?
- Maxaan samayni karaa si aan ilmahayga guriga ugu taageero barashada akhriska?
- Waa maxay ilaha, barnaamijyada waxbarida, ama barnaamijyada kale ee dugsiga kadib ee uu heli karo ilmahayga? Ilahaan maxaliga ah ma caawiyay carruurta kale ee qaba baahiyaha waxbarasho ee la midka ah?

Sida uu dhigayo sharciga Ohio, ardayda lagu soo dalacsiyo ka-dhaafidan waxay heli doonaan ugu yaraan 90 daqiiqo oo barid akhris maalinle ah oo ay ku jirto taageerada waxbarasho ee degdega ah ilaa ilmaha wax ku akhrinayo heerka fasalka.

Haddii aad jeclaan lahayd in ilmahaaga loo gudbiyo fasalka 4-aad, waxaad isticmaali kartaa [Tusaalahan Wargada Codsiga Ka-reebista ee Waalidka](#) si aad ugu sheegtid dugsiga ilmahaaga. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dammaanadda Akhriska ee Fasalka Saddexaad waxaa laga heli karaa [mareegta Ohio Waaxda Waxbarashada iyo Shaqada \(Department of Education and Workforce\)](#). Si aad u akhriso luqadda sharciga ah ee khusaysa ka-dhaafitaankan, raadi Ohio Revised Code 3313.608.